# HANTAAQADA LOO GEYSTAY HANTIDII UMMADA:

# HARGEYSA WOMEN'S CLUB

# HOOYO HAWEEYA CABDI MOOGE (IHUN)

Bahda Mareegaha Farshaan

Noofember, 2018

Hordhac:




Bishii Noofember 13$^{dii}$, 2017$^{kii}$ ayaa dalka Soomaaliland waxaa ka dhacdey doorashadii madaxweynaha iyo madaxweyne ku xugeenka. Waa dhaqan ay doorasho kasta oo aduunka ka dhacdaa leedahayee xanaf iyo inay isku maandhaafaan xisbiyada natiijadii doorashada ayaa timid. Hase yeeshee dacwad loo gudbiyey maxkamada ma dhicin, sidaa darteed ayey maxkamada qaranku go'aamisay in musharaxiintii Xisbiga Kulmiye ku guulesyteen doorashadaa. Sidaa darteed waxaa dalka Soomaaliland loo caleemo saarey Mudanayaasha Muuse Biixi Cabdi iyo Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil "Saylici " inay siday u kala horeyaan u kala noqdaan madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen.

Maalmo ka dib ayaa madaxweyne Muuse Biixi soo saarey warbixin ah in qof kasta oo xil ka qabta xukuumadiisa uu soo bandhigi doono hantidiisa gaarka. Tani waxay aheyd ugub oo dadkii way soo dhaweeyeen, aadna way ugu riyaaqeen, hase yeeshee waxay noqotay hadal loo bogay oo xukuumada Muuse Biixi fulintiisii ka gaabisay.

Mar kale ayaa wasaarada hawlaha guud iyo guryeyntu u soo bandhigtay qorshe ay ku ururinayso xogta hantida qaranka. Sida caadada u ah dadka wanaagsan ee reer Soomaaliland ayaa soo dhaweeyey una hanqal taagey hirgalinteeda. Waxaa markaaba maanka dadweynaha dhex jibaaxey in la dabaqabanayo boobka hantida ummada wixii hadhay, sidoo kalena laga dabatagayo intii hore ee si xaq daro ah gacanta ugu gashey dadweyne adeegsadey awood xukuumadeed.

Bishii Sebtember 1[dii],2018[kii] ayaa la qabtey xafladii soo bandhigida barnaamijka ururinta xogta qaranka. Waxaa ka so qayb galay madaxweyne Muuse Biixi oo ku amaaney wasaaradaa inay soo bandhigto inay ururinayaan xogta hantida qaranka iyadoo tamarteedu ay aad u yar tahay shaqaale ahaan, dhaqaale ahaan iyo qalab ahaanba, hase yeeshee dal kasta oo hurumay dad baa u kaca oo tabaruc sameeya si ay jiilka danbe uga faa'iidaystaan uguna aayaan sida dalalka la majiirto ee ay ka mid yihiin Maraykanka, Shiinaha iyo Itoobiyadaa jaarkeena ah. wuxuu Madaxweyne Muuse ku bilaabey khudbadiisii: " Aad baan ugu mahadnaqayaa wasaarada inay soo qabanqaabisay barnaamijkan lagu diiwaan galinayo hantida qaranka".

Isagoo madaxeyne Muuse Biixi sii wata hadalka ayuu yidhi: " Qof kasta oo guri dhisanayaa wuxuu u samaystaa mulkiyad,dee inaga waxaa inagu waajiba inaan mulkiyad u samayno hantidii qaranka.Waayo aragnimadu waxay ina tustay in loo haysto wixii dawladu leedahay waa bilaash".

Waxaa kaluu Madaxweyne Muuse faahfaahin ka bixiyey hab-dhaqanka dadka oo iska hor imanaya, wanaagna way doonayaan in loo hawlgalo, haddana halwgalkii ayey ka hor imanayaan, isagoo arintaa ka hadlayana wuxuu yidhi:

"Dadku laba arimood oon is waafaqsaneyn ayey naga doonayaan wax noo nidaami oo wax noo qurxi iyo buurtaa anigaa leh oo amar qaadan maayo, wanaagna wuu naga doonayaa, qaabkii wax loo wanaajinayeyna wuu diidayaa, ama waxaabu la soo istaagayaa dawladu way ku cadaadineysaa"

Ka dib khudbado laga jeediyey goobtaas, ayaa wasiirka hawlaha guud iyo guryeynta mudane Cabdirashiid Xaaji Ducaale Qambi ayaa sidoo kale soo bandhigay in shaqaalaha loo kala dirayo gobolada dalka si ay u soo ururiyaan xogtaas.

Bulshada reer Soomaaliland oo aad u soo dhaweysay qorshahaas ayaa markiiba waxaa maankooga ku soo maaxey boogtii damqeysay. Waxaa mar kaliya bulshadu ku wada dhawaaqdey dugsigii dhaqaalaha ee Xaaji Haweeya iyo ardeydii wax ka baraneysay ayaa Illaahay u soo diray gargaar. Waxaa wali maankooga ku soo maaxaya weedhihii uu markii la duminayey dugsigaa uu ku dhawaaqey mid ka mid ah macalimiintii dugsigaasi oo yidhi: "Hooyo wax la barey waa qaran wax la barey. Waxaan filayaa xukuumada –Siilaanyo-waxaa u hadhey inay masjid Jaamaca Hargeysa iibiyaanee ee kaalaya oo iibiya".

Waxay aheyd weedh runtii bulshada daneeya, garanaya qiimaha waxbarashada iyo kaalinta uu dugsigaasi kaga jiray bulshada ku reebtay uur ku taalo. Madaxweyne Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal (IHUN) oo ogaa halgankii aqooneed ee ay Hooyo Haweeya Cabdi Mooge(IHUN) soo gashey iyo kaalinta ay bulshada ku laheyd ayaa dugsigaa si gaar ah u hoos keenay wasaarada waxbarashada, kuna caleemo saarey in lagu sharciyeeyo hooyada ummada ee Haweeya. Wasiirkii wasaarada waxbarashada ee xilligaa mudane Axmed Yuusuf Ducaale oo aanu ka wareysaney ayaa yidhi:" Dugsigaa waan ogaa aasaaskiisii, sidoo kale waxaanu la soconay kaalinta midho dhalka ah ee ay hooyo Haweeya ku leedahay bulshada iyo waxbarashada haweenka, sidaa darteed daryeel agab iyo dhaqaale ayaanu u fidinay dugsigaasi".

Dadka xilligii la unkay ama sidii lagu bilaabey ogaa dugsigaa waxaa ka mid ah Eng. Maxamed Xaashi Cilmi. Mar uu ka falcelinayey weedhii uu ka jeediyey madaxweyne Muuse Biixi madashii lagu soo bandhigayey qorshaha ururinta xogta hantida guud ayuu yidhi Eng. Maxamed Xaashi ""Hantidan Umadda ee la yidhi hala diiwaangaliyo waa shay loo baahan yahay, kolkaa diiwaan-galintaa waxa ku jiraysa Xaruntii Women's Club-ka ee la dumiyay ,waana waxyaabaha aan ka filayno in la soo Celiyo".

Dadka aad u daneeya ilaalinta hantida siiba goobaha aqoon korodhsiga ayaa hadalheynta ku badiyey in uu mudane Muuse Biixi ku dhiiran doono ku soo celinta gacanta dawlada meelaha ay ka mid yihiin Dugsiga Xaaji Haweeya (Hargeisa women's club), Madashii Kaydka buugaagta ee Gaandhi, Guriyihii la isku qoray,iwm. Haddii aaaney iman dhiiranaanta la filayo , tanina waxay la mid noqon doontaa qawda maqashii oo waxba ha u qaban. Hase yeeshee in laga hor dhaco ma wanaagsana, waana guul la filayo inay hirgasho, oo la helo rag dhiiranaanta intaa leeg leh. Ididiiladu ma xumo oo durba lagu diirsey soo celinta haamaha shiidaalka, baa'biinta shirkadihii gaarka loo lahaa ee madaarka Cigaal International,erigii NGO-yadii wax ma tarayaasha ahaa eek u ladhnaa wasaaradaha dawlada ,iwm.



Sida la wada ogsoon yahay Dugsiga Xaaji Haweeya wuxuu jaar wadaag wanaagsan la lahaa guriga uu lahaan jiray Cali Jirde (IHUN). Waxaaney ku wada joogeen nabad iyo caano, hase yeeshee iminka dugsigaasi inta la burburiyey ayaa lagu daray oo wakhtigan uu barxad

gaadiidka la dhigto looga dhigay  Huteelka Aamina Weris ee Jirde Hotel. Tani waxay huteelka summad uga dhigaysaa inuu yahay “Huteelka Booli Qaran”. Waxaa kaloo murugo iyo ciil leh in ardeydii dugsigaasi  oo xilligaasi  2015kii ku dhaweyd 2000 (laba kun) oo ardey  la kala direy ilaa iminkana ay ku maqan yihiin in dugsigii la dayac tirayo.Waxaana go’aankaa soo jeediyey oo xilligaa ahaa wasiirka waxbarshada Faarax Cilmi Geedoole oo haystay amarka xukuumadii Siilaayo.  Ummadaasaa la leeyahay horumar ha gaadho!!!

Haddaba waxaynu si  gaar ah u guda gali doonaa taariikhda dugsigaa la odhan jiray Women’s Club,kuna danbeeyey magaca Dugsiga dhaqaalaha haweenka ee Xaaji Haweeya iyo taariikh halgameedkii  Xaaji Haweeya(IHUN).

La soco qaybaha danbe..

Fu’aad Sheekh

Bahda Mareegaha Farshaxan

www.farshaxan.com  iyo www.farshaxan.org